

## **Sida la isku diiwaangeliyo si aad u codeyso**

Haddii aadan ka diiwaangalsaneyn kan Agoosto 2-deeda ee doorashada koowaad, waxaad iska diiwaangelin kartaa halkan **Michigan.gov/Vote**.

Waxaad u baahnaan doontaa inaad xaqijiso aqoonsigaaga oo ay la socdaan xog shakhsiyadeed oo ay ku jirto shatigaaga daraawalnimada ee Michigan ama nambarkaaga Aqoonsiga ee gobolka.

Kadibna waxaa lagugu diiwaangelin doonaa daqiqado yar gudohooda.

Haddii kale, waxaad soo dejisan kartaa barnaamijka, buuxi kadibna iimeyl ahaan uga dir karraanigaaga.

Haddii aad haysanin shatiga daraawalnimada ee Michigan ama Agoonsiga gobolka, ama aad lahayn adeega intarneetka, waxaad iska diiwaangelin kartaa xafiiska karraaniga ee deegaan doorashadaada.

Sidoo kale, haddii ay tahay 14 maalmood inta ka dhiman doorashada, **kadib Luulyo 18-deeda**, iskagama diiwaangelin kartid doorashada Agoosto si onlayn ah ama iimeyl ahaan oo waxaana qasab kugu ah in aad aodo xafiiska karraanigaaga ee doorashada si aad isku diiwaangeliso.

Waxaad ka heli kartaa cinwaanka karraanigaaga iyo telefoon nambarkiisa halkan **Michigan.gov/Vote**.

Goorta aad aodo xafiiska karraanigaaga, waxaad u baahnaan doontaa in aad keento cadeynta deganaanshaha.

Dukumiintiyaasha la aqbali karo waxa ka mid ah

- Shatida daraawalnimada ama kaarka Aqoonsiga gobolka
- Biilka masruufka hadda
- Bayaanka bangiga
- Mushaarka ama
- Jeega dowlada ama dukumiintiyaasha kale ee dowlada.

Qaabka dijitaalka ah ee dukumiintiyaashan sidoo kale wuu shaqeyn doona.

Waad iska diiwaangelin kartaa xafiiska karraanigaaga ilaa 8-da galabnimo Maalinta Doorashada oo walina waad codeyn kartaa. Dhab ahaantii, laga bilaabo **Juun 23-deeda**, haddii aad iska diiwaangeliso xafiiska karraanigaaga, waad codeyn kartaa inta aad halkaas ku sugaran tahay oona waxaad ku heli kartaa in aad dhamaan ku sameyso hal safar.

Sidaas darteed, is diiwaangeli maanta oo ku muuji codkaaga doorashada Agoosto 2-deeda.